HM Government

Grenfell community updates

# Grenfell Tower community update: November 2025 - Somali / Af-Soomaali

**Xogaha cusub bulshada Grenfell Tower: Nufeembar 2025**

Waxaan aqoonsannahay in Grenfell Tower uu muhiimad gaar ah oo qoto dheer u leeyahay dadka ay sida aadka ah u saamaysay masiibada iyo in dhulku uu yahay mid xasuus gaar ah ugu fadhiya qoysaska. Waxaan dooneynaa inaan kula socodsiino shaqadeena la xariirta sida aan qaab taxadar leh ugu dumin doono Dhismaha.

Xogtaan cusub waxaad ku heli kartaa xog dheeraad ah oo ku saabsan:

- **Duminta Dhismaha**
- **Rakibida boorar cusub**
- **La socoshada xogaha la xariira busta, qaylada iyo gariirka**
- **Jadwalka shaqooyinka Kirismaska iyo Sanadka Cusub**
- **Taageerada caafimaadka iyo badqabka guud**

Waxaad xogihii hore ka heli kartaa: www.gov.uk/grenfell-community-updates

## Duminta Dhismaha

Waxaan maqalnay inay muhiim tahay inay jirto xusuus muuqata oo ma turjumaysa Dhismaha inta si taxadar leh loo duminayo. Waxaan ku rakibnay nalal si tiirarka dhismaha kor ugu iftiimaan gaar ahaan kuwa gees kasta oo dhismaha.

- Laga bilaabo Axada 14 ka Diseembar, waxay iftiimi doonaan habeen kasta muddo aan ka horrayn 5ta galabnimo, ilaa 11ka habeenimo.
- Markay tahay 14 ka Diiseembar iyo 14 ka Juun, waxaanu shidi doonaa 72 laydh cagaaran si aan u xusno taariikhaha muhiimka ah ee sanadka.
- Waxaan tijaabin doonaa nalalkaan waqti gaaban fiidkii Sabtida 13 ka December.
- Haddii aad jeclaan lahayd inaad aragto sida ay nalalka u ekaan doonaan, waan ku farxi doonaa inaan kula wadaagno sawirada - fadlan iimayl noogu soo dir: GrenfellTowerSite@communities.gov.uk
- Boorarka wadnaha Grenfell waxay sii wadi doonaan inay ifaan laga bilaabo maqribkii.

## Rakibida boorar cusub

Waxaan u wareejin doonaa boorarka wadnaha Grenfell qaybta hoose ee Dhismaha inta shaqadu socoto. Horaanta Janaayo, waxaan ku dari doonaa boorar qaybta hoose ee Dhismaha. Marka arrintaan lagu daro, waxaan ka saari doonaa kuwa sare.

## La socoshada xogaha la xariira qaylada, busta iyo gariirka

Dowlada waxaa ka go'an inay hubiso in dhammaan shaqada ka socota goobta Grenfell Tower loo fuliyo qaab heer sare ah. Badbaadada iyo badqabka bulshada iyo dadka ka shaqeeya goobta ayaa ah mudnaanteena koowaad.

Waxaa jira saddex kormeerayaal gariir oo laga helo goobta Dhismaha iyo shan kormeerayaal tayada hawada ah, iyo saddex kormeerayaal oo la socda qaylada oo ku wareegsan xadka goobta, dhammaantoodna uruurinaya xog toos ah. Bil kasta, waxaanu daabacnaa xogtaan. Si aad u aragto xogta 29 Sebteembar ilaa 2 Nufeembar, fadlan guji lifaaqyada hoose:

Xogta La socoshada qaylada - 29 ka Sebteembar ilaa 2 da Nufeembar 2025

Xogta la socoshada busta - 29 ka Sebteembar ilaa 2 da Nufeembar 2025

Xogta la socoshada gariirka -29 ka Sebteembar ilaa 2 da Nufeembar 2025

Hay'ada Amniga Caafimaadka ee UK (UKHSA) waxay sii wadi doonaan inay qiimeeyaan oo ay la socdaan tayada hawada ee aagga ku xeeran Grenfell Tower inta ay shaqadu socoto. Waxay awoodaan warbixintooda bil kasta. Waxaad ka arki kartaa warbixintii ugu dambeysay halkaan:
La socoshada bay'ada kadib dabka Grenfell Tower - GOV.UK

## Jadwalka Kirismaska iyo Sanadka Cusub ee goobta Grenfell Tower

- Jimcaha 19 ka Diseembar , 8.30 subaxnimo ilaa 12 galabnimo - subaxda shaqadu ka socoto goobta
- Jimcaha 19 ka Diseembar, 12ka duhurnimo ilaa 5ta galabnimo - shaqadu waxay istaagtaa 12ka duhurnimo kadibna goobta waxaa loo diyaariyaa fasaxa kirismaska iyo sanadka cusub
- Isniinta 22 ka Diseembar ilaa Axad 4 ta Janaayo – wax shaqo ah lagama qabanaayo goobta, marka laga reebo amniga iyo dayactirka joogtada
- Isniinta 5 ta Janaayo, 8.30 subaxnimo ilaa 5 galabnimo - shaqada sida taxadarka leh loogu duminaayo Grenfell Tower waxay bilaabmaysaa mar kale kadib fasaxa kirismaska iyo sanadka cusub

## Taageerada caafimaadka iyo badqabka guud

Taageerada shucuurta iyo badqabka ee jirka waxay sii wadaa inay diyaar u tahay qoysaska murugaysan, dadka masiibada ka badbaaday, iyo dadka degan aagga

goobta u dhaw inta lagu jiro shaqada sida taxadarka leh loogu duminaayo Dhismaha.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad la hadasho qof, waxaad:

- Wici kartaa Adeegga Badqabka guud ee Grenfell ood ka wici karto 020 8637 6279 (8da subaxnimo ilaa 8da habbeenimo, maalin kasta)
- Wici kartaa Central and North West London NHS Foundation Trust's (CNWL) aad ka wici karto khadka tallada ee xaaladaha degdega ah, adoo ka wacaya: 0800 0234 650 (wuxuu furan yahay 24 ta saacadood maalintii, todobada maalmood ee asbuuca)
- Iimaylka: grenfell.wellbeingservice@nhs.net
- Booqo: www.grenfellwellbeing.cnwl.nhs.uk si aad u hesho xog dheeraad ah

Si aad u hesho xogtii ugu dambeysay ee ku saabsan adeegyada la heli karo, booqo www.grenfell.nhs.uk

## Sida naloola hadlo ama loo helo xog dheeraad ah

Waxaan dooneynaa inaan u wadaagno xogta qaabab adiga kugu habboon. Waxaan sii wadi doonaa inaan wadaagto xogihii u dambeeyay bilaha soo socda www.gov.uk/grenfell-community-updates Haddii aad doorbideyso, waxaan xogaheena joogtada ah kuugu soo diri kartaa iimayl toos ah.

Waxaad la hadli kartaa saraakiisha iyo qandaraaslaheena koowaad si aad ugala hadasho shaqada, la wadaagto walaacyada aad qabto iyo si aad su'aalo u waydiiso kulamadeena caadiga ah. Kulanka soo socda waa 16 ka Diseembar - haddii aad rabto inaad ka soo qaybgasho fadlan nagala soo xiriir ciwaanka iimaylka hoose si aad u hesho faahfaahin. Waxaan diyaar u nahay inaan shaqsi ahaan ama koox ahaan idin kula hadalno waqtiga, taariikhda, iyo goobta kugu habboon ee aad dooneysaan.

Fadlan nala soo xiriir haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah oo la xiriira shaqooyinka ama aad dooneyso inaad nala hadasho. Waxaad nagala soo xariiri kartaa iimaylka: GrenfellTowerSite@communities.gov.uk

Si aad u hesho xogihii u dambeeyay ee ku saabsan Grenfell Tower, iyo si aad iska qorto fariimaha iimaylka, fadlan booqo: www.gov.uk/grenfell-community-updates ama iskaan garee koodhka QR-ka hoose.

Waxaan jeclaan lahayn inaan adiga kaa maqalno sida aad doorbidayso inaad u

hesho wararka ku saabsan shaqadeena ka jawaab celinta musiibadii ka dhacday Grenfell Tower. Haddii aad jeclaan lahayd, waxaad wadaagi kartaa ra'yigaaga adiga oo buuxinaya foomkeena jawaab celinta degdega ah:
Bulshada Grenfell: Foomka Xiriirka Jawaab Celinta - GOV.UK